Dhib ma ku qabtaa kuwa bixiya adeegyada korontada, iyo gaaska ama biyaha?

Wac Ombudsman-ka Tamarta iyo Biyaha

Revised November 2017

SOMALI

Ombudsman-ka Tamarta iyo Biyaha Western Australia waa hay'ad madax banaan oo aan dhinacna raacsanayn taas oo baarta xalisana dacwadaha la xiriira bixiyayaasha adeegyada korontada, gaaska iyo biyaha Western Australia.

Adeegayagu waa lacag la'aan.



Yaa awooda in uu noo dacwoodo?

Deganayaasha iyo macaamiisha ganacsiyada yaryar ee gaaska, korontada, ama biyaha iyo dadka kale oo ay waxyeelleen adeega biyaha way noo dacwoon karaan iyaga oo afka nooga sheegaya ama soo qoraya. Waxaad u ogolaan kartaa qof kale inuu ku hadlo afkaaga.

Yaad nooga dacwoon kartaa?

Waxaad nooga dacwoon kartaa kuwa bixiya adeegyada korontada, gaaska iyo biyaha oo ku qoran websaytkayaga: **www.ombudsman.wa.gov.au/energyandwater** ama waxaad nagala soo xiriiri kartaa wixii macluumaad ah.

Maxaad nooga dacwoon kartaa?

Ka hor inta aadan nala soo xiriirin, waxaa waajib ah inaad isku daydo inaad xaliso dacwadaada adeegbixiyayaasha korontada, gaaska ama biyaha. Haddii dacwadaada aan la xalin, ama ay jirto daahid aan macquul ahayn, waad nala xiriiri kartaa. Dacwadaada waxaa waajiba inay ku saabsanaato xaallado aad ogeyd muddo aan ka yarayn 12 bilood (haddii aanay jirin xaallado khaasa).

Maxaanu baari karnaa?

- **Bixinta adeegyada korontada, gaaska ama biyaha –** waxaana ka mid ah tayada iyo ku tashiga bixinta bulaacadaha, biya-mareenada ama tuubooyinka qaada biyaha.
- **Bixinta biilasha** – kuwaas oo ay ku jiraan biilasha la isku diidan yahay ee akhrinta mitirka, ujrada iyo lacag ka dhamista hawlgabka.
- **Deynta iyo bixinta** – oo ay ku jirto qadarinta xaalladaha macmiile gaar ah.
- **Soocelinta Deynta** – kuwaas oo ay ku jiraan qaadista deynta.
- **Jarista adeega** – taas oo ay ku jirto xanibaada bixinta.
- **Lacag bixinta mustawayaasha adeega** – Buuxin la'aanta mustawayaasha adeega biyaha iyo korontada.
- **Suuqgeynta** – Kuwaas oo ay ku jiraan gaaska, korontada ama biyaha si loo gado lana kala wareejiyo adeegbixiyayaasha.
- **Isticmaalida awooda sharciyeed wixii la xiriira dhulka** – kuwaas oo ay ku jiraan awooda adeegbixiyaha wixii la xiriira qofka dhulkiisa, deriskiisa ama guriga.
- **Adeegyada biyaha oo waxyeella qof** – kuwaas oo ku jiraan dad aan ka ahayn macmaaiil kale.

Maxaanaan baari karin?

- Goynta qiimaha ama cashuurta ama go'aan ka gaarida qaabka qiimaha.
- Waxa nadaamka Dawladu ka kooban yahay. (Tusmada shuruucda Xukuumada).
- Xarakaadyada ganacsiga oo aanu daboolin laysanka adeega biyaha ama gaaska, iyo korontada.
- Dacwooyinka hadda lagu jiro, ama ay horay ay gashay maxkamadi, ama Tribunal ama Ombudsman-ku waa inay wax ka qabataa maxkamad ama Tribunal.
- Arrimaha sharci ahaan loo baahan yahay inay wax ka qabato hay'ad kale oo sharciyeed.

Waxaa laga yaabaa in aan ka cudurdaarano haddii aanay ku saabsanayn waxyaalla kugu dhacay ama kuu saameeyey shakhsiyan ama ay jiraan hay'ado ku haboon inay wax ka qabtaan ama loo baahan yahay baaritaana siyaada ah.

Maxaa dhacaya markaad dacwad samayso?

Si aan wax uga qabano dacwadaada waxay ku xiran tahay talaabooyinka horay loo qaaday si loo xaliyo, sida sawirka lagu muujiyey.

Waxaanu ku weydiin doonaa inaad isku daydo inaad la dhamayso arrinta adeegbixiyayaasha biyaha, korontada iyo gaaska ugu horrayn. Haddii dacwadaada aan wax laga qaban, waan baari doonaa waana, markay ku haboon tahayna, isku deyi doonaa xalinta dacwada.

Maxaa dhacaya haddii aan baarno?

Annagu dhinacna lama jirno mana matalayno qaybna wax qabadkayaguna maaha rasmi sida ugu dhaqsaha badan ayaa wax looga qabanayaa.

Waxaanu la xiriiraynaa kuwa ku siiya si aan macluumaad badan uga hello kuwaas oo ku saabsan welwelkaaga. Waxaana laga yaabaa inaan kula soo xiriiro si aan u hello macluumaad intaas ka badan una dhegaysano adiga iyo adeegbixiyaha.

Waa in aan waxyaalla mucayina ku xisaabtanaa, sida:

- Xaalladaha ka baxsan maaraynta maangalka ah; iyo
- Ficilada nadaamiyuhu kula taliyey bixiyaha inuu qaado.

Waqtigay qaadanayso in lagu baaro waa kala duwanaan kartaa. Arrimaha aadka u qalafsan, waxay nagu qaadanaysaa waqti in aan ku soo ururino kuna qadarino macluumaadka khuseeya oo dhan. Waan kula soo xiriiri doonaa inta baaritaanku socdo marka wax ku soo kordhaan kayskaaga. Haddii dacwadaadu qaadato in ka badan intii caadiga ahayd, waan kula soo xiriiraynaa si aan kuula socodsiino horrumarka baaritaankaaga.

Sidee dacwadayda lagu xalinayaa?

Inat baaritaanku socdo, waxaan eegaynaa fursadaha lagu xalin karo dacwadaada heshiis la dhexdhigayo adiga adeegbixiyahaaga. Haddii aad xalka ogolaato, waan joojinaynaa baaritaankayaga dacwadana waan xiraynaa.

Telefoonada dacwoodaha, u qor ama booqo Ombudsman-ka Tamarta iyo Biyaha



Haddii bixiyahaagu aan ogolaan karin inuu xal kula gaaro:

- Waxaa laga yaabaa in aan qaadano aragti ah in dacwadaada aan daliil loo hayn ama in aan la bixin xal maangal ah xaallada jirta waana joojinaynaa baaritaankayaga; ama
- Ombudsman-ka ayaa laga yaabaa inuu xaliyo dacwadaada isaga samaynaya go'aan meelmar ah oo fal adeegbixiyuhu ay tahay inuu qaato si loo xaliyo arrinta. Ombudsman-ku wuxuu awood u leeyahay inuu sameeyo go'aan meelmar ah oo qiimahiisu gaari karo $20,000 ama ilaa $50,000 heshiiskak lala gelayo adeegbixiyaha. Adeegbixiyuhu waa inuu raacaa go'aanka Ombudsman-ka laakiin waa laga yaabaa inaad doorato inaad aqbasho ama diido. Haddii aadan aqbalin go'aanka, waxaad raadsan kartaa xal kale adoo adeegsanaya xalal kale oo aad helli karto.

Sidaad nagula xiriiri karto

Waxaad na weydiin kartaa macluumaad ama waxaad ku soo xerayn kartaa dacwad qoraal ah ama afka ah meelaha hoos ku yaalla ama waxaad isticmaali kartaa foomka oline-ka ah ama waxaad ka daabacan kartaa foomka websaytkayaga.

Energy and Water Ombudsman Western Australia

Street Address: Level 2, Albert Facey House, 469 Wellington Street Perth WA 6000 (saacadaha shaqada 9:00Subax ilaa 4:30Galab)

Postal Address: PO Box Z5386 St Georges Terrace Perth WA 6831

Tel: 08 9220 7588 **Lacag:** (lacag lagaa qaadi mayo telefoonka laynka ah) 1800 754 004

Adeega Tarjumida iyo Afcelinta: 131 450 *(Dadka u baahan mutarjumka)*

Adeega Gudbinta ee Qaranka: *(Adeega dadka aan hadli karin ama aan wax maqal)*
Isticmaalayaasha TTY ama modem-ka 133 677 tixraacna 08 9220 7555
Cod keliya (hadal iyo dhegaysi) isticmaalayaasha telefoonka 1300 555 727 oo tixraac 08 9220 7555
SMS Relay text 0423 677 767 and quote 08 9220 7555

Email: energyandwater@ombudsman.wa.gov.au

Website: www.ombudsman.wa.gov.au/energyandwater